



**<Blank>**

# Ka Badbaa di Qoyska Halistा Leedhka



United States  
Environmental  
Protection Agency



United States  
Consumer Product  
Safety Commission



United States  
Department of Housing  
and Urban Development

# Miyaad Doonayasaa Inaad libsato, Kiraysato, ama Cusboonaysiiso Aqal la Dhisay Ka Hor 1978?

**G**uryo iyo abaartameentooyin badan ee la dhisay ka hor 1978 ayaa qaba rinji uu ku badan yahay leedhka (kaasoo loogu yeedho rinjiga leedhka wata). Leedhka rinjiga ku jira, jibiska iyo boodhka waxaa ay keeni karaan halis caafimaad haddii aan laga taxaddirin.



**Milkiileyaasha, libsadeyaasha iyo Kireesteyaasha** waxaa la dhiirigelinaya inay iska baaraan leedhka (Eg bogga 6aad) inta aney kireysan, ibsan ama cusbonaysiin aqalladala dhisay ka hor 1978.

Sharciga federaalka ayaa doonaya in shaqsiyaadka la siiyo macluumaad ka hor inta aanney kiraysan, iibsan ama cusbonaysiin aqallada la dhisay ka hor 1978.



**MILKIILEYAASHA** waxaa laga doonayaa in ay soo bandhigaan macluumaadka ee ku saabsan halista rinjiga leedhka uu ku jiro inta aanney kirayn . Caqdiga kirada waa in lagu caddeeyaa rinjiga leedhka uu ku jiro.



**IIBIYEYAASHA** waa in ay shaaca ka qaadaan macluumaadka ay og yihiin ee ku saabsan halista rinjiga leedhka uu ku jiro inta aanney iibin aqalka. Qandaraaska iibka waa in lagu caddeeyaa haddii uu aqalka qabo rinjiga leedhka. libsadeyaasha waa in muddo 10 cisho gudahood isaga eegaan leedhka.



**CUSBOONAYSIYEYAASHA** ka shaqaynaya in ka badan laba fiit oo wareeg ah oo saqafka rinjiyeysan waa inay ku siyyaan qoraalkan inta aanney shaqadu billaabin.

# Muhimad !

## Leedhka Ranjiga, Boodhka, iyo Ciidda Halis Badan Ayuu Keeni Karaa Haddii Aan La Xakameyn

**CADDAYN:** Leedhku wuxuu dhibaato u geysan karaa carruurta iyo dhalaanka xitaa inta aysan dhalan.

**CADDAYN:** Carruur kuula muuqata in ay caafimaad qabaan ayaa leedhka laga dhex heli karaa dhiigooda

**CADDAYN:** Liidku jirka dadku wuxuu u soo maraa neefsashada ama liqid boor leedh leh, ama cunid carro ama jajab ringi leh leedh.

**CADDAYN:** Dadku wuxuu u madax banaanyahay sidii uu isaga yareyn lahaa khatarta leedhka. Xaaladaha badankood rintiga ka sameysan leedhka, balse ku sugaran xaalada wannaagsan ma laha wax khatar ah.

**CADDAYN:** Xaaqida ama baabi'inta rintiga leh leedhka oo aan loo raacin si cilmi ku dhisan waxay kordhin kartaa khatarta caafimaadka qoyska.

Haddii aad ka cabsi qabtid in gurigaagu uu leeyahay halista rintiga leedhka, akhri buugan si aad u baratid talaabooyin fudud aad ku ilaalisid caafimaadkiinna.

## Leedhku Si Kala Duwan Ayuu dhka ugu Gudbaa

---

**Sunta carruurta  
leedhka ka soo  
gaaro waa  
mushkilad  
caafimaadka  
dabiiciga ee  
Maraykanka  
haysta**

---

---

**Xittaa carruurta  
u eg inay  
caafimaad  
qabaan waxaa  
jidhkooda ku jiri  
kara leedh  
heerkiisu  
sarreeyo.**

---

### Dadku waxaa uu leedhku jidhkoodu gali garaa haddii:

Ay ku dhex neefsadaan boodhka leedhka leh (qaasatan waqtiga cusboonaysiinta ee wax yeelaya rinjiga saqafayada dusha sare).

Gacmahooda ama afkooda geliyaan waxyaabo leh boodh leedh wata.

Ay cunaan jajabka ranjiga ama ciidda leh leedhka.

### Leedhku wuxuu aad khatar ugu yahay carruurta 6 jir ka yar:


Maskaxda yo habdhiska dareemayaasha carruurta waxay u nugul yihiin raad reebka sunta leedhka.

Carruurta koreysa jirkoodu aad buu u dhuuqaa leedhka.

Carruurta badanaaba waxay gacmahood iyo waxyaaba kale galiyaan afkooda. Waxyaabahaa waxaa guudkooda dabooli kara boor leedh leh.

### Leedhku waxaa uu xitta qatar u yahay gabdhaha qaangaara ee carruurta dhali kara:

Haweenka uu jidhkoodu ku jiro heerar sare oo leedh ah ka hor inta aanney uurka qaadin, waxaa uu leedhku u gudbi karaa ilmaha caloosha ku jira.



### **Dhibaatooyinka uu carruurtu ku reebi karo leedhka:**

Waa muhiim in la ogaadaa, xittaa carruurta uu dhiigoodu ku yar yahay leedhka, waxaa uu ku reebi karaa xannuun iyo kadeed kale oo ay ka mid yihii.

### **Carruurta, waxaa uu leedhka u keeni karaa:**

Dhaawac xagga maskaxda iyo hab dhiska dareemayaasha  
jirka.

Dhibaato xagga waxbarashada iyo dabeeecadda dad la dhaqanka (sida fudeed iyo wax maql la'aan).

Dhibaato xagga hadalka, luqadda , iyo dhaqanka.

Qaabka murqaha ay u shaqeeyaan oo xun.

Hoos u dhac korriinka.

Dhibaato xagga maqalka dhagaha (dhagool).

Iyadoo ay aad u badan tahay dadka in yar leedhka uu gaaro, heerarka sare ee leedhka qatar wayn ayuu u gaysan karaa carruurta, oo ay ku jiraan qalal, suuxdin, iyo, mararka qaarkood, dhimasho.

Inkastoo ay carruurta u nugul yihii qatarta leedhka, sidoo kale dadke wayn halis ayeey u tahay.

### **Sidoo kale leedhka dadka waaweyn wuxuu u**

### **geystaa dhibaatooyin ay ka mid yihii:**

Kadeed iyo dhib fara badan haweenka uurka leh.

Dhaawac uu u gaysto dhallaanka uurka ku jiraan.

Dhibaatooyin habdhiska taranka ee Ragga iyo Haweenka.

Dhiig Kar.

Dhibaato habdhiska dheefshiidka.

Dhibaato hab dhiska dareemayaasha jirka.

Dhibaato xagga xasuusta iyo feejignaanta (sida fahmidda).

Murqo iyo guntimo (isgooyada jirka) xannuun.

---

**Leedhku  
siyaalo badan  
ayuu jidhka u  
saameeyaa.**

---

# Xaggee Baa Laga Helaa Rinjiga Leedhka Ka Samaysan

**Guud ahaan, inta uu gurigaagu duq yahay, waxay dfu badan tahay inuu rinjiga leedhka qabo.**

Aqallo badan oo la dhisay ka hor 1978, ayaa waxay leeyihiin rinjiga ka sameysan Leedhka. Dowladda dhexe ayaa joojisay isticmaalka rinjiga ka sameysan leedhka sannadkii 1978. Gobollada qaarkood ayaa joojiyay ka hor sannadkaa. Leedhka waxaa laga heli karaa:

Aqallada ka dhisan magaalada, duleedka magaalada, iyo kuwa la xiriira baadiyaha.

Abaartmentayaasha, guryaha qoysaska, iyo aqallada dadweynaha iyo kuwa qaaskaba.

Gudaha iyo dibedda aqalka.

Ciidda ku wareegsan aqalka dulleedkiisa.

## Ka Hubi Qoyskaaga Halista uu Leedhku Leeyahay

**Aqalkaaga iyo carruurtaada haddii aad moodaysid, ka baar heerarka sare ee leedhka**

Si aad uga yareysid carruurtaada khatarta leedhku leeyahay waan in dhiigooda la baraa, sidoo kala isna guriga waan in la baraa (gaar ahaan haddii guriga lagu rinjiyeeyay rinji leh leedh badan ama la dhisay ka hor 1978), si loo yareeyo khatarta ka imaan karta.

Heerka leedhka dhiigga carruurta ku jira ayaa suuragal ah inuu aad sare ugu kaco laga billaaabo 6 illaa 12 bilood, uuna aad u sii kaco 18 illaa 24 bilood.

Sidaas darted waan in aad la tashataa takhtarkaaga caruru. In yar oo dhiig ah oo laga qaado ayaa lagu ogaan karaa heerka u marayo leedhka ku jira dhiiga caruruada:

caruru da'doodu tahay 1 iyo 2 sano.

Dhammaan caruru ama ka tirsanayaasha qoyska, kuwaas oo ku noolaa aqal uu ku badanaa leedhka.

Carruurta la doonayo in laga baaro leedhka sida ku cad qorshaha baaritaanka gobalkaaga ama degmadaada.

Takhtarkaaga ayaa kuu sharixi doona jawaabta dhiiga iyo haddii loo baahan yahay in lagaa qaado dhiig kale.

## Tilmaanta Halista Leedhka

**Rinjiga leedhka ka samaysan** badanaaba halis ma laha haddii xaaladdiisu wanaagsan tahay, uusanna marsanayn saqafyada sare, sida daaqadaha.

Waxaa ay dowladda federaalka ku micnaysaa in rinjiga leedh leeyahay haddii heerkisu ka badan yahay ama la mid yahay 1.0 milligram santimir afar geesood ah, ama miisaankiisu ka badan yahay 0.5% .

**Rinjiga leedhka ka samaysan oo xaaladdiisu sii xumanayso (diirmo, fiiqmo, dildilaac ama halaaba)** waa midka khatarta leh una baahan talaabo ka qaadid deg-deg ah.. Sidoo kale waa qatar haddii uu marsan yahay saqafka sare ayna carruurta calaajin karaan ama halaysn yahay, sida:

Daaqadaha iyo xakabada daaqada.  
Albaabada iyo wareega albaabka.  
Jaranjarada, daaradda, iyo deydka.

**Leedhka ku jira jajabka rinjiga ee aad arki karto iyo boorka aan muuqanba, labaduba halis caafimaad ayeey wataan.**

**Boodhka Leedhka** wuxuu sameysmaa marka Rinjiga leedhka ka sameysan oo qalalay la xoqo, noqdo carro qalashay, ama la kululeeyay. Boorku sidoo kale wuxuu sameysmaa marka shey lagu garaaco ama la xoqo sagxaddii rinjiga la mariyay. Jajabka leedhka iyo boorkiisaba waxaan ka heli karnaa sagxadaha ama shey kale ee uu gaaray firirka rinjiga, kaasoo dadku gacanta ku taaban karaan. Boorka leedhka ee meel dagay, wuxuu dib u soo noqon karaa marka leysku dayo in la xaaqo, ama dadku ku kor socdaan.. Labadan xeer ee federaalka ayaa loo sameeyey halista boorka leedhka:

40 maykarograam afar-geesood laban laaban ( $\mu\text{g}/\text{ft}^2$ ) iyo ka badan dabaqyada sare, oo uu ku jiro dhulka kaarbetka leh.

250  $\mu\text{g}/\text{ft}^2$  ama ka badan gudaha xakabad daaqadda.

**Leedhka carrada** wuxuu noqon karaa mid halis ah marka carruurtu ay ku ciyaaraan carro qaawan oo aan caws kore laheen ama carro la socota kabaha dadka soona galiyaan guriga. Labadan xeer ee federaalka ayaa loo sameeyey halista boorka leedhka:

400 qaybood malyankiiba (ppm) iyo ka badan goobta lagu cayaaro ee carrada qaawan.

1,200 ppm (qiyaastii) iyo ka badan inta ka hartay goobta carrada qaawan.

Sida kaliya lagu ogaan karo halista leedhka ranjiga, boorka iyo carrada waa iyadoo la baaro. Bogga soo socda ayaa sheegaya qaababka kala duwan ee lagu baaro.

## Ka Hubinta Aqalkaaga Leedhka

**Ogaanta in  
aqal uu qabo  
ranjiga  
leedhka kuu  
sheegi mayso  
haddii ay  
halis jirto.**

Siyaalo kala duwan ayaad aqalkaaga uga baari kartaa leedhka:

- ~ **Baaritaan** ranji ayaa kuu sheegi kara haddii aqalkaagu qabo ranji leedh ka smaysan iyo halka uu ku yaal. Kuuma sheegayo haddii uu aqalkaagu haatan leeyahay halis leedh ah.
- ~ **Qiimaynta Heerka Qatarta** waxay ku sheegeysaa haddii ay jiraan ilo khatar ah oo soo gudbinayaa leedhka suntiisa sida qolfaha rinjiga iyo habaaska leedhka leh. . Waxaa kaloo uu kuu sheegayaa talaabadii laga qaadi karo khatartaas..
- ~ Isku dar ah qiimaynta halista iyobaaritaanka ayaa kuu sheegaya haddii aqalkaagu qabo halis ranjiga leedhka, iyo halka ranjiga leedhka uu marsan yahay.

Qoro xirfadle u tababarayn kaasoo adeegsanaya habab isku xiran marka uu aqalkaaga baaray.

- ~ Baaris Indha-indheyn barta rinjiga iyo xaaladi.
- ~ Qalab raajo (x-ray) oo leh iftiin wax cawira.
- ~ Sheybaar leh noocyoo rinjiyo kala duwan,qalabka lagu tijaabiyo sagxadda boorka leh iyo carrada.

Waxaa jira barnaamijyo goboleed iyo kuwo federaali ah ee lagu xaqiijinayo in si huban aan halis lahayn wax loo baaro. La xiriir hay'adda gobolkaada ama deegaankaada. (eeg bogga 11 hoostiisa) si aad macluumaad dhereaad u heshaa, wac **1-800-424-LEAD (5323)** oo aad u heshaa liiska deegaankaaga.

**Waxaa la helaa xirmo (kit) loo isticmaalo tijaaboguri ee leedhka, balse cilmi baaris la sameeyay ayaa muujisay in badanaaba uu sax aheyn.** Macmiilkii waa in aysan isku halayn xirmadani (kit) ka hor inta eysan sameyn dib-u cusbooneysiinta aqaladood.



## **Maxaad Samayn Kartaa si aad u Dhawrtid Caafimaadka Qoyskaada**

Haddii aad ka shakisid in aqalkaagu leeyahay qatarta leedhka, waxaad qaadi kartaa talaabooyin degdeg ah si aad u yareyso qatarta qoyskaaga ka soo gaaraysa:

- ~ Haddii aqalku kiro yahay, u sheeg qofka iska leh ama mas'uul ka ah in uu aqalku leeyahay diirkac, dildilaac, ama jajab rinji ah..
- ~ Si dhaqsa ah u nadiifi rinjiga jajabkiisa..
- ~ Nadiifi sagxadda dhulka, meegaarka daaqada, xakabada daaqada, iyo todobaad kasta. Isticmaal xaaqin burush leh ama isbuunyo leh biyo diiran iyo guud ahaan wax kasta oo wax lagu nadiifyo ama u gaar ah leedhka.. XASUUSO: MARNA HA ISKU QASIN WARAKIINO IYO AMMOONIYA MAADAAMA AY SAMAYN KARAAN GAAS HALIS AH.
- ~ Gabi ahaan biyo raaci madaxa xaaqinka kaddib marka aad meelaha boorka iyo wasaqda leh ku nadiifisid.
- ~ Dhaq gacmaha carruurta, gaar ahaan kahor cunta cunidda iyo hurdada habeenkii iyo maalintiiba.
- ~ Mar kastaba meelaha lagu ciyaaro waa in ay nadiif ahaataa.. Dhaq dhalada caanaha, iyo waxyaaba caruurta lagu cayaarsiiyo.
- ~ Ka ilaali carruurta in ay calaliyaan daaqada xakabadeed ama sagxad kasta oo rinji leh.
- ~ Nadiifi ama siib kabaha inta aadan soo galin guriga, si loo hakiyo leedhka-ciida la socda in uusan u soo gudbin gudaha aqalka.
- ~ Hubi in ay carruurtu cunaan cuno nafaqo leh, dufankuna ku yar yahay, kuna badan tahay birta iyo **kaalshiyamka**, sida khudaarta isbiinashka iyo waxyaabaha caanaha laga suubiyo. Carrurta cunta cuno dheelitiran jirkoodu ma dhuuqayo leedh badan.



# Dhimista Halista Leedhka Gudaha Aqalka

Nadaafad joogta ah iyo dheefin fiican waxaa raaca:

**Si qalad ah oo  
loo xoqo  
leedhka  
waxaa ay  
siyaadin  
kartaa halista  
kaga soo  
aadaysa  
qoyskaada.**

**Marwalba  
adeegso xirfadle  
ku taqasusay  
xoqista leedhka.**



8

~ **Si ku meel gaar ah** ahaan waad ku dhimi kartaa halista leedhka adigoo tallaabo qaadaya, sida dayactirka dhaawaca soo gaaray sagxadihi la rinjiyeeyay iyo caws lagu abuuro ciida leh leedh farabadan. Talaabooyinkan oo lagu magacaabo (maamulid ku meel gaar ah) waa kuwo xal ku meel gaar ah qaba, una baahan feejignaan joogta ah.

~ Si loogu sameeyo **minguurin joogta** ah leedhka halista ah, waa in aad kireysataa qandaraasle shahaado u leh baabi'inta ama yareenta leedhka. Yareenta (ama baabi'inta halista joogtada ah) hababka loo adeegsado waxaa ka mid ah xaaqitaan, daboolitaan ama xiritaan lagu sameeyo rinjiga ka sameysan leedhka iyadoo la isticmaalayo qalab gaar ah. Kuma filna in rinjiga halista ah la kormariyo rinji caadi ah.

Mar kastaba kireyso qof tababar gaar ah u leh looguna talagalay saxitaanka dhibaatooyinka leedhka, lehna qalabka u gaarka ah nadiifinta guud. Qandaraaslaha Shahaadada qaba ayaa shaqaaleynaya shaqaale xirfaddan leh oo waliba si adag u raacaya xeerarka ay dowladda federaalka dajisay..

Mar haddii shaqada la dhammeystiro, hawlahada nasaafadda boorka waa in lagu celceliyaa illaa baaritaanka uu tilmaamo in heerka boorka leedhka leh uu ka yar yahay:

- ~ 40 maykaroograam afar-geesood laban laaban ( $\mu\text{g}/\text{ft}^2$ ) iyo ka badan dabaqyada sare, oo uu ku jiro dhulka kaarbetka leh;
- ~ 250  $\mu\text{g}/\text{ft}^2$  ama ka badan gudaha xakabad daaqadda. iyo
- ~ 400  $\mu\text{g}/\text{ft}^2$  daaqadaha..

Waxaad wacdaa hay'adda gobalkaada ama deegaankaada (eeg hoosta bogga 11aad) si aad u heshaa saacidaad ah helitaanka khabiirrada shahaadada leh ee deegaankaaga iyo haddii uu jiro gargaar lacageed..

# Dibu Jadiidin ama Cusbonaysin Aqalka Ieh Rinjiga Leedhka ka Samaysan

Ka digtoonow ka hor qandaraaslahaaga ama ka hor inta aadan bilaabin dib u jadiidinta ama cusbooneysiinta kaasoo qayiraya sagxadihii la rinjiyeeyay (sida rinjiga oo la xoqo ama darbiga oo la diiro).

**Waa in sagxadaha aqalka laga tijaabiyo  
rinjiga ka sameysan leedhka.**



Ha u isticmaalin inaad ku baabi'isid rinjiga ka sameysan leedhka qalabka ey ka mid yihii: - darbi xoqe, warqada carada leh ee wax lagu xoqo, qori wax lagu kululeeyo, iwm. Iisticmaalka qalabkan wuxuu abuuri karaa boor iyo qaac badan oo leh sunta leedhka. Markaa boorka leedhku wuxuu ku nagaan karaa aqalka muddo dheer kaddib marka shaqada la dhameeyo.

~ **Si ku meel gaar ah ka guuri qoyskaaga**  
(qaasatan carruurta iyo haweenka uurka leh) meel ka baxsan abartameentada ama aqallada illaa ay shaqada ka dhammaato halkaana si wanaagsan loo nadiifiyo. Haddii aadan guuri Karin qoyskaaga, waa in ugu yaraan si xooggan loo daboolaa halka ay shaqada ka socoto.


**Raac qiyaasaha badbaadada ee lagu  
yaraynayo halista leedhka.** Waxaad heli kartaa habab kale oo lagu yareen karo leedhka marka aad wacdid 1-800-424-LEAD (5323). Waydiiso buugga yar ee ka hadlaya "yareenta khatarta leedhka marka aad gurigaa ku sameynayso dib u jadiidin" Buuggani waxaa uu ku sharxayaa waxyaabaha aad qaban kartid ka hor, islamarkaa iyo kaddib cusbooneysiinta aqalkaaga.

Haddii aad horay u dhameysay dib u jadiidinta iyo cusbooneysiinta lagana yaabo in uu sii daayo sunta leedhka ama boor, waa in carruurtaada la baraa adigoo raacaya talaabooyinka aan ku soo sheegnay booga 7aad ee buuggan.

**Haddii aan  
si habboon  
loo sameyn,  
cusboonaysi  
inta  
qaarkoood  
waxay ku sii  
dayn karaan  
hawada ranji  
iyo boor.**



## Ilaha Kale ee Leedhka Laga Helo



**Iyadoo rinjiga,  
boorka, iyo carrada  
ay yihiin  
waxyaabaha  
leedhka laga helo,  
waxaa jira  
waxyaabo kale ee  
leedhka laga helo.**



~ **Biyaha la caboo.** Waxaa laga yaabaa in aqalkaagu leeyahay qasabado leedh leh ama alxan leh leedh. Wac waaxda caafimaadka ee degmadaada ama qaybta biyo qaybinta si loo hubiyo biyahaaga. Lama arki karo, lama dha-dhamin karo, lamana urin karo leedhka, kuna bixi maayo karin la karkariyo biyaha. Haddii aad ka cabsi qabtid qasabadahaaga in ay leeyihiin leedh.:

- U isticmaal kaliya biyaha qaboor cabitaan iyo raashin.
- Inta aadan cabin biyaha, ha socdeen muddo dhan 15 ilaa 30 il-biriqsi.qaasatan ahaan haddii aadan isticmaalin biyaha dhawr saacadood.
- ~ **Shaqada.** Haddii ay shaqadaadu tahay leedhka, waad keeni kartaa aqalkaaga, lisagoo soo raacaya gacmahaaga iyo dharkaagaba. Soo mayro, iskana soo baddel dharka shaqada ka hor inta aadan imaan aqalka. Si gooni ah u kala dhaq dharka shaqada iyo kuwa kale ee qoyskaaga.
- ~ Rinjiga waa hore la mariyay qalabka carruurta lagu cayaarsiiyo (**Toys**) iyo Alaabta guriga la dhigto (**furniture**).
- ~ Alaabta cuntada iyo biyaha lagu kaydiyo oo ka sameysan **Leedhka** ama **dhari** la mariyay rinjiga leedh ka sameysan..
- ~ **Leedh dhalaaliya** ama warshadaha hawada ku sii daaya leedhka.

~ **Qofka Hiwaayadiisu** tahay in uu isticmaalo leedhka, sida sameynta dharyaha ama koobabka la xardho, ama baabi'in qalab ka sameysan leedhka.

- ~ **Dawo dhaqmeed** oo ka sameysan leedh sida "Greta iyo azarcon" oo lagu daaweyyo caloosha kacsan.

## Warbixin Dheeraad ah

### Xarunta Warbixinta Leedhka ee Qaranka

Wac **1-800-424-LEAD (424-5323)** si aad u baratid sida aad kaga difaaci lahayd carruurtaada sunta leedhka iyo warbixinno kale oo ku saabsan halista leedhka. (bogga internetka: [www.epa.gov/lead](http://www.epa.gov/lead) iyo [www.hud.gov/lead/](http://www.hud.gov/lead/)).




### EPA's Taleefanka Ururka Daryeelka Biyaha La Cabo

Wac **1-800-426-4791** si aad u heshaa macluumaad ku saabsan leedhka ku jira biyaha la cabo.

### Taleefanka Consumer Product Safety Commission (CPSC) Hotline

Si aad u codsataa macluumaad la xiriira alaabta uu leedhka ku jiro, ama aad soo wargelisaa alaab halis ah ama dhaawac alaab ay sababtay, wac **1-800-638-2772**, ama booqo bogga internetka ee CPSC's [www.cpsc.gov](http://www.cpsc.gov).



### Hay'adaha Caafimaadka iyo Dabiiciga

Magaalooyinka qaarkood, gobollada, yo qabaa'illada ayaa qaba sharchyo u gaar ah ee la xiriira hawlaha rinjiga leedhka ka samaysan. Ka eeg hay'adda deegaankaada si aad u eegto sharciga ku saamaynaya. Hay'adaha badankood waxay bixin karaan macluumaad shirkadaha ka shaqeeya baabi'inta rinjiga leedhka ee deegaankaada, iyo macluumaad la xiriira gargaarka lacageed ee baabi'inta halista leedhka. Waxaad ka heshaa cinwaan cusub iyo macluumaad taleefan ee xiriirka deegaankaada bogga internetka [www.epa.gov/lead](http://www.epa.gov/lead) ama la soo xiriir Macluumaadka Qaranka Leedhka Xaruneeda Warbixinta **1-800-424-LEAD**.

Dadka maqalka ka liita, waca Adeegga Macluumaadka Federaalka **1-800-877-8339** si aad u heshaa taleefoonnada buugan ku yaal.

## Xafiisyada Gobolka ee EPA

---

Xafiiska Gobolka EPA ayaa macluumaad dheeraad ah kaa siin kara shuruucda iyo barnaamijyada ka badbaadka leedhka.

### EPA Regional Offices

**Region 1** (Connecticut, Massachusetts, Maine, New Hampshire, Rhode Island, Vermont)

Regional Lead Contact  
U.S. EPA Region 1  
Suite 1100 (CPT)  
One Congress Street  
Boston, MA 02114-2023 1  
(888) 372-7341

**Region 2**(New Jersey, New York, Puerto Rico, Virgin Islands)

Regional Lead Contact  
U.S. EPA Region 2  
2890 Woodbridge Avenue  
Building 209, Mail Stop 225  
Edison, NJ 08837-3679 (732)  
321-6671

**Region 3** (Delaware, Maryland, Pennsylvania, Virginia, Washington DC, West Virginia)

Regional Lead Contact  
U.S. EPA Region 3 (3WC33)  
1650 Arch Street  
Philadelphia, PA 19103  
(215) 814-5000

**Region 4** (Alabama, Florida, Georgia, Kentucky, Mississippi, North Carolina, South Carolina, Tennessee)

Regional Lead Contact  
U.S. EPA Region 4  
61 Forsyth Street, SW  
Atlanta, GA 30303  
(404) 562-8998

**Region 5** (Illinois, Indiana, Michigan, Minnesota, Ohio, Wisconsin)

Regional Lead Contact U.S.  
EPA Region 5 (DT-8J) 77  
West Jackson Boulevard  
Chicago, IL 60604-3666  
(312) 886-6003

**Region 6** (Arkansas, Louisiana, New Mexico, Oklahoma, Texas)

Regional Lead Contact  
U.S. EPA Region 6  
1445 Ross Avenue, 12th Floor  
Dallas, TX 75202-2733  
(214) 665-7577

**Region 7** (Iowa, Kansas, Missouri, Nebraska)

Regional Lead Contact  
U.S. EPA Region 7  
(ARTD-RALI)  
901 N. 5th Street  
Kansas City, KS 66101  
(913) 551-7020

**Region 8** (Colorado, Montana, North Dakota, South Dakota, Utah, Wyoming)

Regional Lead Contact  
U.S. EPA Region 8  
999 18th Street, Suite 500  
Denver, CO 80202-2466  
(303) 312-6021

**Region 9** (Arizona, California, Hawaii, Nevada)

Regional Lead Contact  
U.S. Region 9  
75 Hawthorne Street  
San Francisco, CA 94105  
(415) 947-4164

**Region 10** (Alaska, Idaho, Oregon, Washington)

Regional Lead Contact  
U.S. EPA Region 10  
Toxics Section WCM-128  
1200 Sixth Avenue  
Seattle, WA 98101-1128  
(206) 553-1985

## Xafiisyada Gobolka ee CPSC

---

Xafiiska Gobolkaaga ee CPSC ayaa ku siin kara macluumaad dheeraad ah ee la xiriira shuruucda iyo badbaadada alaabta macmiilka

### **Eastern Regional Center**

Consumer Product Safety Commission  
201 Varick Street, Room 903  
New York, NY 10014  
(212) 620-4120

### **Western Regional Center**

Consumer Product Safety Commission  
1301 Clay Street, Suite 610-N  
Oakland, CA 94612  
(510) 637-4050

### **Central Regional Center**

Consumer Product Safety Commission  
230 South Dearborn Street, Room 2944  
Chicago, IL 60604  
(312) 353-8260

## Xafiiska HUD ee Leedhka

---

Fadlan kala xiriir Xafiiska HUD ee Caafimaadka Aqallada iyo Xakameynta Halista Leedhka si aad u heshaa macluumaad la xiriira shuruucda leedhka, dadaalka looga hortagayo, iyo xakameynta halista leedhka iyo maalgelinta barnaamijyada cilmi baarista.

### **U.S. Department of Housing and Urban Development**

Office of Healthy Homes and Lead Hazard Control 451  
Seventh Street, SW, P-3206  
Washington, DC 20410  
(202) 755-1785

---

Warbixintani waa mid shacabeeed. Dib ayeey ha'yadi u samayn kartaa iyadoon fasax loo qabin. Macluumaadka buuggani waxaa uu salaysan yahay fahamka waqtii xaadirka ah ee sayniska iyo farsamada ee arrimaha la soo bandhigay waxaana uu hoos imaanaya shuruucda hay'adaha ay qusayso. Raacitaanka talada la bixiyay ma bixinayso badbaado buuxda markasta ama halista caafimaadka ka imaan karta leedhka.

---

U.S. EPA Washington DC 20460  
U.S. CPSC Washington DC 20207  
U.S. HUD Washington DC 20410

EPA747-K-99-001  
June 2003

# Tallaabooyin Fudud ee aad Qoyskaada Kaga Badbaadin Kartu Halista Leedhka

## Haddii aad moodid in aqalkaadu leeyahay leedh farabadan:

- ~ Carruurta ka baar leedhka xittaa haddii ay u eg-yihiin in ay caafimaad qabaan.
- ~ Dhaq gacmaha carruurta, dhalooyinka iyo waxyaabaha caadiyan laqu civaarsiyo.
- ~ Hubi in carruurtu cunaan raashin caafimaad leh, oo subagga ku yar.
- ~ Aqalkaaga ka baar halista leedhka.
- ~ Caadiyan nadiifi dhulka, daaqadaha, iyo saqafyada dushooda.
- ~ Ka jaf carrada kabahaada inta aadan aqalka soo galin.
- ~ Kala hadal cidda aqalka iska leh in ay hagaajiyaan saqafyada dushooda fiiqmo ama rinjiga jibin (chipping).
- ~ Ka taxaddir boodhka leedhka wata marka aad wad dib u habaynaysid (wac 1-800-424-LEAD si aad u heshaa tilmaamo).
- ~ Ha isticmaalin suunka wax lagu xoqo, baastoolada wax lagu kuleeyo, xoqe, ama warqadda carrada ka suubsan ee lagu xoqo meesha rinjiyaysan ee leedhka qabi karta.



Recycled/Recyclable

Printed with vegetable oil based inks on recycled paper  
(minimum 50% postconsumer) process chlorine free

